Name
Address Line 1
Address Line 2
Address Line 3
Address Line 4
Address Line 5

Person ID: xxxxxx Application ID: IPPA xxxxxx

**Diyaarinada ku meelgaarka ah ee bilaabida Xeerka Magangalyada Caalamiga ah 2015**

Dear XXXXX,

Waxaan tixraacay codsigaaga hadeer ee Heerka Qaxootiga ah/ Ilaalada Caalamiga ah ee Gobolka.

Waxaan jeclahay inaan ku soo ogeysiiyo in diyaarinada cusub ee baaritaanka iyo go'aaminta codsiyada ilaalada caalamiga ah (heerka qaxootiga iyo ilaalada caalamiga ah) iyo ogolaanshaha loogu joogayo Gobolka waxaa lagu soo bandhigay Xeerka Ilaalada Caalamiga ah 2015 (Xeerka 2015) taas oo uu bilaabay Wasaaradda Cadaaladda iyo Sinnaanta ee **31 Desembar 2016** (taariikhda bilowga").

Sida waafaqsan Xeerka 2015, nidaam hal ah oo cusub ayaa la soo bandhigay. Sida waafaqsan xeerkaan, codsade ayaa ka codsanayo Xafiska Magangalyada Caalamiga ah, Adeega Dhalashada iyo Socdaalka, ee labadaba heerka qaxootiga iyo magangalyada caalamiga ah. Xafiska Magangalyada Caalamiga ah ("IPO") waxay bedeshay Guddiga Xafiiska Codsiyada Qaxootiga (ORAC) kaas oo buriyay.

Halka codsi cusub ee magangalyada caalamiga ah lagu sameeyay sida waafaqsan Xeerka 2015, IPO ayaa baarayo isla wakhtigaas haddii ama uusan codsadaha la siinayo heerka qaxootiga ama magangalyada caalamiga ah. Haddii tallo xun lagu sameeyo sida waafaqsan kuwaan, Wasiirka wuxuu, iyada oo aan jirin tallaabooyin nidaam dheeraad ah ama warqada, go'aanso haddii ama codsadaha la siinayo ogolaanshaha loogu joogayo Wadanka sabab walba (oo ay ku jiraan tixgelinada bani'aadanimada ama tixgelinta gaarka ah). Marka laga reebo nidaamkaan waa halka codsiga lagula macaamilayo sida waafaqsan Sharciga EU ee

Dublin, ee dacwada diyaarinada bedelka kale ay quseyneyso - fiiri qeybta 10aadee Buugyaraha Warbixinta ku lifaaqan Codsadaha ee Magangalyada Caalamiga ah (IPO 1). Tani waa bedelka ka imaanayo nidaamyada hore, taas oo, haddii Wasiirka diido heerka qaxootiga, Wasiirka ayaa kadib siinaya codsadaha fursada lagu codsanayo ilaalada caalamiga ah iyo si loo sameeyo matalaadaha sida sababta dalabka dib u celinta waa in aanan la sameynin.

**HEERKA CODSIGAAGA**

Xeerka 2015 wuxuu wataa qodobo ku meel gaar ah ee ku lug leh codsiyada ee heerka qaxootiga iyo ilaalada caalamiga ah ee taas oo lagu sameeyay ORAC bilaabida Xeerkaas 2015. Sida waafaqsan Xeerka 2015, codsiyadaan waxaa loo wareejinayaa Xafiska Magangalyada Caalamiga ah si looga baarandago sida waafaqsan Xeerkaas.

Codsigaaga magangalyada caalamiga ah wuxuu ku dfaboolanyahay **Qeybta 3 (Magangalyada Caalamiga ah)** ee qeybta 4aadee Qoraalka Warbixinta ku lifaaqan (IPO 12). Sida aad codsatid magangalyada caalamiga ah ka hor taariikhda bilowga iyo ORAC maysan bilaabin baaritaanka codsigaaga taariikhdaas, codsigaaga waxaa loo arkayaa inuu yahay codsiga magangalyada caalamiga ah sida waafaqsan Xeerka 2015. Feelkaaga waxaa loo wareejiyay IPO oo tixgelinta u qalmidaada la filan karo ee magangalyada caalamiga ah. Talada codsigaaga qaxootiga ee ay sameeyeen ORAC (iyo go’aanka racfaan walba oo lagu sameeyo RAT halka ay quseyso) waxaan dhowreynaa oo waxay ku hareysaa.

**Sida codsiga jiritaankaaga ee magangalyada caalamiga ah waxaa lagu tixgelinayaa sida waafaqsan qodobada kumeelgaarka ee Xeerka 2015, UMA BAAHNID INAAD U SAMEYSID CODSI KALE EE MAGANGALYADA CAALAMIGA AH. Si kastaba, waxaa lagaa rabaa inaad u sheegtid warbixin dheeraad ah Xafiska Magangalyada Calaamiga ah adiga oo buuxinayo qeybaha codsiga ee Codsiga Foomka su’aalaha Magangalyada Caalamiga ah ee ku lifaaqan (IPO 2).**

**QORAALKA WARBIXINTA IYO WARAAQAHA KALE EE KU LIFAAQAN**

Sharaxaad kaloo badan ee saameynta qodobada kumeelgaarka ah ee Xeerka 2015 waxaa lagu dajiyay warqada ku qoran **“Qoraalka Warbixinta - Diyaarinada Kumeelgaarka ah (IPO 12).”** Warqadaan waa in lala akhriyaa Qoraalka Warbixinta.

Waraaqaha xigga way ku lifaaqanyihiin:

- **Qoraalka Warbixinta - Diyaarinada Kumeelgaarka ah (IPO 12).**
- **Warbixinta Buug-yaraha ee Codsadayaasha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 1)**, iyo
- **Codsiga foomka Su’aalaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 2).**

**QEYBAHEE FOOMKA SU'AALAHA MAGANGALYADA CAALAMIGA AH AYAA ADIGA BUUXINAYO?**

Tilmaanta xigta waxaa lagu bixiyaa sida loo buuxiyo Foomka su'aalaha Magangalyada Caalamiga ah.

**<u>Waa inaad buuxisaa dhammaan qeybaha Codsiga ku lifaaqan Foomka su'aalaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 2) marka laga reebo qeybta la xiriirto heerka qaxootiga (Su'aalaha 63a iyo63b).</u>**

Haddii IPO ku taliso in codsigaaga magangalyada caalamiga ah, go'aanka ayaa kadib loo sameynayaa sida haddii ay tahay in lagu siiyo ogolaanshaha loogu joogayo sabab kale.

Waa muhiim in la qoro in bilaabida Xeerka 2015, nidaamyada ay isbedeshay. <u>Wasiirka markale kuma soo qorayo casuumaad aad ku matashid sida sababta laguugu ogolaanayo inaad joogtid Wadanka</u>. Bedelkii, ogolaanshaha lagu joogayo waxaa la tixgelinayaa iyada oo aan jirin wax daahitaan ah haddii IPO ku taliso in codsiga magangalyadaada caalamiga ah in la diido.

<u>Sidaas darteeda, adiga ayay kuu taalaa inaad dajisid wax sababo ah oo qoraal ahaan sababta aad u tixgelisid in laguugu siiyo ogolaanshaha lagu joogayo marka aad buuxineysid qeybta ku haboon ee</u>Codsiga foomka Su'aalaha Magangalyada Caalamiga ku lifaaqan (IPO 2). Oo qaab tusaalaha, qoyskaaga iyo xaaladaha gudaha, nooca xiriirkaaga Wadanka, dabeecadaada iyo dhaqanka labadaba oo gudaha ama banaanka Wadanka iyo tixgelinada bini'aadanimada sidoo kale waa filashada arimaha la xiriiro ee xaaladaan. Sharaxaad buuxdo ee arimaha la xiriiro, fiiri warbixinta Buug yaraha ee Codsadaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 1).

Waxaa sidoo kale kugu waajib ah inaad ku haysid IPO (oo matalaada Wasiirka) oo la soo ogeysiiyay isbedel walba ee xaaladahaaga ee xaaladaan ee laga yaabo inay waafaqsantahay (tusaale ahaan xaaladaha qoyskaaga ama guriga ama xaalada wadankaaga asalka).

**MAXAAN HADEER SAMEEYAA?**

**Marka aad buuxisid oo aad saxiixdid Codsiga Foomka su'aalaha Magangalyada Caalamiga ah (IPO 2), waa inaad nagu soo laabataa, iyo la jiro warbixin walboo dheeraad ah iyo waraaqda aad rabtid inaad tixgelisid oo aadan horay u bixin ORAC, ee baqshada BOOSTADA LACAG LA'AAN AH ee lagu lifaaqay. Foomka su'aalaha waa in nalagu soo celiyaa, haddii ay suurtogal tahay, aanan ka dambeynin 20 maalmood oo shaqo ka bilow taariikhda warqadaan.**

**Haddii adiga iyo/ama la taliyahaaga sharciga u baahantihiin inaad u sheegtaan warbixin dheeraad ah IPO kadib markaad xareysay warbixinta kore, waa inaad sidaas ku sameysaa sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogalka ah iyo, haddii aad sidaas sameyn kartid, waa inaysan ka daahin <u>labo isbuuc</u> ka hor taariiqda wareysigaaga balansan. Baaxada**

**waqtigaan waxay fududeyneysaa kumeelgaarka waraaqaha haddii loo baahdo oo la hubiyo in wareystaha IPO hayo dhammaan waraaqahaaga oo dhan ee la heli karo oo loogu tixgeliyay mar hore taariiqda wareysiga.**

**WAREYSIGA**

Waxaa xigo helitaanka foomkaaga su'aalaha la buuxiyay, IPO ayaa kula soo xiriirayo xiligaas oo wadata taariikhda wareysigaaga magangalyada caalamiga ah. Sida aad horaan u heshay go'aanka codsigaaga heerka qaxootiga, wareysiga wuxuu daboolayaa arrimaha magangalyada caalamiga ah kaliya. Wareysigaaga <u>laga yaabo in aanan loo balamin tirada bilaha sabab la xiriirto tirada badan ee codsiyada ee ay ka baaran dagayaan IPO.</u>

**DEGAN WADANKA**

Shuruudaha la xiriiro deganaanshahaaga ee Wadanka isma bedeleyso. Shahaadada Deganaanshaha Kumeelgaarka (TRC) oo marhore laguu sameeyay waxaa loo arkayaa inay tahay shahaadada ruqsada deganaanshaha ee lagu sameeyay sida waafaqsan qeybta 17 ee Xeerka 2015 oo way shaqeyneysaa oo waana la cusbooneysiin karaa illaa codsigaaga magangalyada caalamiga ah la go'aansado.

**TALADA SHARCIGA**

Waxaa lagula talinayaa inaad qaadatid talo sharci ee la xiriirto warqadaan iyo waraaqaha ku lifaaqan. Waxaad xaq u leedahay inaad la tashatid qareen oo waad ka faa'idi kartaa adeegyada Guddiga Gargaarka Sharciga. Guddiga Gargaarka Sharciga (LAB) waa hay'ad madax banaan ee siiso adeega sharciga oo qarsoodiga ah dadka ka codsanayo magangalyada caalamiga ah ee Ireland. LAB ayaa ku siineyso caawinta sharciga iyo talada oo taageerada codsigaaga ah. **Sharaxaada xiriirka LAB waxay wadataa Qoraalka Warbixinta ku lifaaqan (IPO 12).**

Waa inaad sidoo kale raadisaa adeegyada qareenka gaarka oo kharashkaaga ah.

Haddii aadan mar hore sameynin sidaas, waa inaad sheegtaa sharaxaada matalaadaada sharciga iyo, haddii ay quseyso, isbedel walba ee wakiilka Xafiiska Magangalyada Caalamiga ah sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogalka ah.

**UNHCR**

Waxaad sidoo kale u qalantaa inaad la tashatid Hay'adaha Qaramada Midoobay ee Qaxootiga ee. **sharaxaada xiriirkooda wuxuu ku jiraa Qoraalka Warbixinta ku lifaaqan (IPO 12).**

**NOQOSHADA IKHTIYAARKA AH**

Haddii aadan rabin inaad sii wadid codsigaaga ee magangalyada caalamiga ah, xor ayaad u tahay inaad isticmaashid dooqa oo ku laabasho aanan qasab aheyn ee wadankaaga asalka. Talada iyo caawinta midaan la xiriirto waxaa lagaaga heli karaa Hay'ada Socdaalka Addunka (IOM) ee **sharaxaada xiriirkooda uu ku jiro Qoraalka Warbixinta ku lifaaqan (IPO 12).**

**LAMBARKA CODSIGAAGA CUSUB**

Lambarka codsigaaga hore markale lama isticmaalayo. Waxaad ogaaneysaa lambarka codsigaaga cusub oo ku bilaabanayo **IPPA** ee dusha warqadaan. Aqoonsigaaga Shaqsiga wuxuu ahaanayaa sidaas.

**CINWAANKAAGA**

Haddii aad bedeshid cinwaankaaga, waa inaad ku ogeysiisaa Xafiska Magangalyada Caalamiga ah **qoraal ahaan**, sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogal ah, kadib markaad guurtid. Fadlan ha iloobin inaad saxiixdid warqada oo ku dar lambarka tixraacga **cusub**.

**WEYDIIMADA**

Haddii aad qabtid weydiimada codsigaaga ee magangalyada caalamiga ah ama warqadaan, fadlan la xiriir (**xiganaya lambarkaaga tixraaca**):

**Customer Service Centre**
**International Protection Office**
**Irish Naturalisation and Immigration Service**
**79 - 83 Lower Mount Street**
**Dublin 2, D02 ND99**
**Telephone: 01 6028008**
**Email: info@ipo.gov.ie**

Qoraalka warqadaan iyo lifaaqyada waxaa nuqul la siiyay wakiilada sharciga.

**Xafiiska Magangalyada Caalamiga ah**
**Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka ee Irish**
**Date**